



Ma iidiin sheegaa acmaashiina kuwa ugu fadliga badan, uguna daahirnimada badan xaga Allaha Boqorkiina ah, uguna sare qaadid badan darajooyinkiina

Abii Dar-daa-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Ma iidiin sheegaa acmaashiina kuwa ugu fadliga badan, uguna daahirnimada badan xaga Allaha Boqorkiina ah, uguna sare qaadid badan darajooyinkiina oo idinka khayr badan inaad dahab iyo lacag bixisaan, oo idinka khayrka badan inaad la kulantaan cadowgiina aadna qoorta ka garaacdaan iyaguna ay qoorta idinka garaacaan?", waxay dheheen: haa Rasuulkii Ilaahayow noo sheeg, wuxuu yiri: "waa dikriga Ilaahay".

[Xadiis Saxyix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu waydiiyey asxaabtiisa: M: 3575 Ma doonaysaan inaan iduin sheego oo idin baro acmaashiina kuwa ugu khayrka badan, uguna sharfta badan, uguna barako badan, oo ugu daahirnimada badan, uguna nadiifsan xaga Allaha Maaliga ah ee casa wajale ah. M: 3575 darajaadkiina janadana iduin kor yeelid badan? Ee idinka khayr badan inaad sadaqaysaan dahabka iyo Fidada? Ee idinka khayr badan inaad gaalada jihaad la gashaan oo aad qoorta ka garaacdaan, iyaguna qoorta idinka garaacaan? Waxay dheheen asaxaabtu: haa, waan doonaynaa, Rasuulkii Ilaahayow. Rasuulku -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: waa dikriga Ilaahay, oo aad xustaan waqt kasta iyo qaab walba iyo xaalad kasta oo aad kuj irtaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3575>